



# **Wakhtigii La Baa'biin Lahaa Gumeysiga Gargaarka**

**Aragtiyaha iyo casharrada laga helay wada-tashi caalami ah**

**Nuxurka Warxbixinta**





## Ku saabsan warbixintan

Bishii Noofambar 2020, Peace Direct oo kaashanaysa Adeso, Alliance for Peacebuilding and Women of Color Advancing Peace and Security, ayaa isugu yimi wada-tashi saddex maalmood ah oo onlayn ah si ay iga wada hadlaan arrinta cunsuriyadda qaabeysan iyo sida ‘Loo Baa’biin Karo Gumeysiga Gargaarka’. In ka badan 150 qof oo isugu jira dhinacyada horumarinta, gargaarka bini’aadantinimo, iyo nabad-dhisidda ayaa ka qeybqaatay wada-tashigaas oo socday muddo saddex maalmood ah, waanan uga mahadnaqaynaa dhammaan intii nala wadaagtay aragtidooda, sheekoo yinkooda iyo falanqeystooda.



## Hordhac

Maaddaama hadal heynta la xiriirta awoodda aan sinnayn ee nidaamka gargaarka caalamiga ahi ay soo gaadheen warbaahinta, hawl-wadeennada maxalliga ahi waxa ay noqdeen kuwo si isa soo taraysa u hadal haya sida awoodda iyo kheyraadka nidaamka ay weli u maamushaan ururo iyo cilaqaad badankoodu ka soo jeeda Waqooyiga Adduunka.

Inkastoo ay jireen ballanqaadyo la sameeyay oo wax lagaga qabanayo sinnaan la'aanta nidaamka, taas oo si gaar ah lagaga dhawaaqay Shir-madaxeedka Bani'aadamnimada Adduunka ee ka qabsoomay Istanbul 2016, wax yar oo horumar ah ayaa laga sameeyay meelo badan oo muhiim ah. Tan waxa ku jira maalgelinta ururada maxaliga ah iyo habka go'aamada, awoodda iyo maamulka ay weli gacanta ugu heystaan tiro yar oo deeq-bixiyeyaa ah iyo INGO-yo ah.

Ka dib mudaharaadyadii Black Lives Matter ee ka bilaabmay Maraykanka sannadkii 2013 ee caanka ka noqday dunida xagaagi 2020, dadka ka shaqeeya qeybta gargaarka ayaa lagu qasbay inay hor yimaadaan xaqqiqa ah in shaqadoodu ay adeegsato cunsuriyad qaabeysan, taas oo aan laga hadlin lana qirin ilaa wakhti yar ka hor mooyee.

Baa'biinta gumeysiga horumarka, gargaarka bini'aadantinimo iyo nabad-dhisidda - dhaqdhaqaaqa wax ka qabashada iyo baa'biinta hababka cunsuriyadda iyo haybsooca ee ku qarsoon aragtida cad ee nidaamka gargaarka - ayaa u soo ifbaxaya sidii wada-hadal degdeg, muhiim iyo waqtidheer ah, taas oo miisaan weyn ku kordinaysa baaqyada jira ee lagu beddelayo nidaamka. Haddii siyaasiyiinta, deeq-bixiyayaasha, xirfadlayaasha, aqoonyahannada iyo dhaqdhaqaaqayaashu aysan bilaabin inay wax ka qabtaan cunsuriyadda qaabeysan iyo waxa ay ka dhigan tahay in la baa'biiyo gumeysiga gargaarka, nidaamku marnaba ma awoodi karo inuu isu beddelo siyaabo si dhab ah awoodda iyo kheyraadka ugu wareejiya daneeyayaasha maxalliga ah.






# Natiijooyinka muhiimka ah

- ↗ Dhaqamo iyo dariiqooyin badan oo hadda jira lagana adeegsado nidaamka gargaarka ayaa u eeg lagana soo xigtay waxyabihii xilligii gumeysiga, taas oo inta badan ururada iyo deeqbixiyayaasha Waqooyiga Adduunku ay weli ka caga jiidayaan inay qirtaan. Qaar ka mid ah dhaqamada iyo caadooyinka casriga ah ayaa xoojiya qaababkii iyo caqidooyinka gumeysiga sida ‘Badbaadiyaha cad’ ee ka muuqda qaadhaan ururinta iyo sawirada isgaarsiinta ee ay adeegsadaan INGO-yada, iyo qaab dhismeedka ururada INGO-yada ee Koonfurta Adduunka ah iyo qaababka ay u dhaqmaan qaar ka mid ah shaqaalaha gargaarka caalamiga ah ee ka shaqeeya Koonfurta Adduunka.
- ↗ Gargaarka u dhexeeya quwadihii hore ee gumeysiga iyo goboladii hore ee la gumeysan jiray ayaa inta badan u eeg xidhiidhkoodii hore ee gumeysiga, iyadoo awoodda go’aan qaadashadu ay ku kooban tahay Waqooyiga Adduunka.
- ↗ Cunsuriyadda qaabeeysan waxay si qoto dheer ugu dhex jirtaa dhaqanka maalinlahaa ah iyo habdhaqanka shaqada ee dadka ku jira qeybta taas oo saameysay habka ay shaqaalaha maxalliga ahi u tixgeliyaan bulshadooda iyo sida ay ula macaamilaan INGO-yada.
- ↗ Qaar ka mid ah luqadaha lagu isticmaalo nidaamka gargaarka ayaa xoojiya fikradaha takoorka iyo cunsuriyadda ee lagula kaco dadka aan caddaanka ahayn. Odhaahda ‘Awood dhisida’ ayaa loo soo qaata hal tusaale oo soo jeedinaya in bulshooyinka iyo ururada maxalliga ahi aysan lahayn xirfado, halka ereyada kale, sida ‘khabuur shaqeed’ ay muujinayaan in Koonfurta Adduunka ay yihii kuwo ‘aan xadaarad lahayn’.
- ↗ Qaar badan oo ka mid ah xirfadlayaasha qeybta gargaarka ee Waqooyiga Dunidu waxay iyaga iyo guud ahaan qeybtooduba isu arkaan inay u shaqeeyaan si dhedhexaad ah, taas oo aan ahayn oo kaliya khayaali, balse sidoo kale xoojisa qaab fikirka ‘badbaadiyaha cad’ iyo ‘raaligelinta caddaanka’ ee ku tallaalan nidaamka gumeysiga.
- ↗ Cunsuriyadda qaabeysani waxay ay faa’ido u leedahay ururada Waqooyiga Adduunka iyo sidoo kale kuwa ka soo jeeda Koonfurta Adduunka ee yaqaana sida loo ‘adeegsado’ nidaamka. Tusaalahaa ugu badan ee lagu soo qaata wadatashigu wuxuu ahaa fursadaha qaadhaan ururinta ee barnaamijyada iyo cilmi-baariista ee ay munaafacaadsadaan tiro yar oo ah ‘kuwii la tuhunsana’ tusaale ahaan INGO-yada xiriirka hore u jiray la leh deeqbixiyayaasha.
- ↗ Mid ka mid ah waxyabaha ugu cadcad ee cunsuriyadda qaabeysan ee qeybta waa nidaamka talantaaliga ah ee shaqaaleysiinta shaqaalaha Koonfurta Adduunka, ma aha oo kaliya marka la eego mushaharka iyo dheefaha la siiyo shaqaalaha Koonfurta Adduunka marka la barbardhigo dhigooda Waqooyiga Adduunka, laakiin sidoo kale sida xirfadaha iyo waayo-aragnimada xirfadlayaasha ka soo jeeda Koonfurta Adduunka loo yaso.
- ↗ Naqshadeynta barnaamijka iyo cilmi-baaristu waxay ku qotomaan qiyamka iyo nidaamka aqoonta ee Reer Galbeedka taas oo la macno ah in barnaamijo badan ay si badheedh ah u abuuraan halbeeg ku saleysan Galbeedka taas oo bulshooyinka ku nool Koonfurta Adduunka looga baahan yahay inay buuxiyaan. Aqoonta maxalliga ah, caadiyan waa la yasaa.
- ↗ Caqabadaha ay la kulmaan xirfadlayaasha midabka leh ayaa la xoojiyaa haddii ay ka tirsan yihii kooxaha kale ee la takooro, kuwaas oo ay ku jiraan haweenka, bulshada LGBTQ\*, bulshada naafada, bulshada aan Af-ingiriisiga ku hadlin, iwm. Isku dayada lagu doonayo in lagu soo afjaro kala qeybsanaanta caalamka iyo maxalliga inta badan waxay diiradda saaraan koox gaar ah, taas oo ku guul dareysata inay dooddha ku darto cunsuriyadda qaabeysan.



# Sida cunsuriyadda qaabeysooni uga muuqato qeybta







# Tallooyinka

## Tallooyinka deeq-bixiyayaasha, INGO-yada iyo siyaasiyiinta

### ↗ Ogow in cunsuriyada qaabeyson ay jirto

Oggaanshaha in cunsuriyada qaabeyson ay jirto ma tirtirayso wanaaga ay qeybtu qabato, sidoo kale ma tilmaamayso diidmada buuxda ee kaalmada/iskaashiga caalamiga ah. Waxaa intaa dheer, oggaanshahu ma muujinayso dembi shahsiyed. Si kastaba ha ahaatee, waxa jirta masuulyad wadajir ah oo wax lagaga qabanayo dhibaatada. Deeq bixiyayaasha iyo INGO-yadu waxay caawin karaan iyagoo xisaabinaya malo-awaalkooda iyo dhaqamadooda, marka la qiimeynayo sida cunsuriyadda qaabeyson uga muuqan karto shaqadooda (eeg jaantuska X). Tani waxa kamid noqon kara baarista sida cunsuriyadda, faquuqa ama mala-awaalka eexda leh ay u saameeyeen xiriirku uu deeq bixiyaha ama INGO-gu la leeyahay ururada iyo dadka maxaliga ah, gaar ahaan haddii daneeyayaasha maxalliga ahi ay haystaan aqoonsiyo la takooro oo badan. Tallaabada ugu horeysa ee muhiimka ahi waxay noqon doontaa in lagu baahiyu bayaan dadweyne mareegta ururka iyo waxyaabaha uu isgaarsiinta u isticmaalo taas oo qiraysa awoodiisa iyo booska uu ku leeyahay nidaamka gargaarka, eexaha laga yaabo inay saameeyeen waxqabadyadii hore ee ururka, iyo nidaamka awoodda ee dadka qaarkood ka horeysiya kuwa kale.

### ↗ Dhiirrigeli wada-hadalada lala yeelanayo deeq bixiyayaasha iyo bulshooyinka ee ku saabsan awoodda

Deeq bixiyayaasha, siyaasiinta iyo INGO-yadu waxay u baahan yihiin inay wakhti badan siiyan dhageysiga tabashooyinka kooxaha iyo bulshooyinka maxalliga ah ee ku saabsan isku dheelitir la'aanta awoodda nidaamka marka ay buuxinayaan baahidooda agab, dhaqaale iyo xirfadeed. Wada-hadalada ku saabsan awoodda, cidda haysata iyo sida ay u adeegsato inta badan ma soo hadal qaadi doonaan kooxaha maxalliga ahi. Sidaas darteed, deeq bixiyayaasha iyo INGO-yadu waa inay oggolaadaan fursadaha lagu naqdinayo awooddooda iyo dhaqamadooda. Tan waxa lagu bilaabi karaa in la weydiyo deeq helayaasha inay buuxiyaan xog ururin qarsoodi ah oo ka codsanaysa aragtidooda ku saabsan ururka, shaqaalahiisa iyo xidhiidhkii hore ee uu la lahaa iyaga. Kadibna waa la sii balaadhin karaa iyadoo laga ururinayo jawaab celin faahfaahsan deeq helayaasha. Hanaanka noocan oo kale ahi wuxuu sameyn karaa aasaaska wada-hadalka wuxuuna abuuri karaa shuruudo u oggolaanaya tan.



### ↗ Samee boos isbeddel lagu sameyn karo

Isbeddellada loo baahan yahay in lagu sameeyo nidaamka waxa hor kici doona daneeyayaasha kala duwan, markaas waxa muhiim ah in deeq bixiyayaasha iyo INGO-yadu ay u abuuraan goobo iyo fursado kooxaha, ururada iyo deeq helayaasha maxalliga ah si ay u wadaagaan khibradaha iyo istiraatijiyadaha. Wawa aad muhiim u ah in la abuuro goobo ay udub dhexaad u yihiin dadka la faquuqo, sida haweenka, dhallinyarada iyo dadka naafada ah. Inkastoo istaraatijiyad dejinta noocaas ahi ay horseedi karto in kooxuhu ka soo horjeestaan awooda ururka ama shakhsiga, waa inay u diyaar garoobaan inay aqbalaan tan, si kastaba oo ay adag tahayba. Dhab ahaantii, haddii wada-hadalka ku saabsan awooddu uusan ahayn mid adag, uma eeka in lagu wadaagay fikrado daahfuran ama daacad ah, ama in la abuuray jawiga awoodsiinta ee lagama maarmaanka ah. Deeq-bixiyayaasha iyo INGO-yadu waa inay sidoo kale oggaadaan in kooxaha qaarkood ay qaadan doonaan boos isbeddel lagu sameyn karo, halkii ay sugi lahaayeen in lagu martiqado boosas cusub oo la abuuray, waana inay diyaar u yihiin inay ka tanaasulaan kaantaroolida hanaanadan.

### ↗ Ka fiirso luqadaada

Dib-u-qiimeynta luqadda jirta, iyo sidoo kale qaadashada luuqad iyo ereybixino cusub waxay gacan ka geysan karaan in la beddelo qaab-dhismeedka ku qotoma taariikhda gumeysiga loona beddelo habab cusub, loo dhan yahay oo hal abuur leh. Deeq bixiyayaasha iyo INGO-yadu waa in ay meesha ka saaraan ereyada aan hadda haboonayn, sida ‘ka faa’idaystayaasha’, ‘karti dhisida’ iyo xitaa ‘gargaarka’ (oo ah erey lagu isticmaalay warbixintan). Bulshada deegaanka waa in loo oggolaadaa in ay hormuud ka noqdaan beddelka erey bixinta, iyada oo ururadu u gudbinayaan bulshada meelaha ay suurtogalka tahay dibna u qiimeynayaan meelaha aanay ahayn.

### ↗ Dhiirrigeli dhaqan soo dhaweeya dhaleecaynta

Waxa loo baahan yahay in la abuuro dhaqan si firfircoor uga soo horjeeda cunsuriyadda, takoorka iyo hadalada iyo dhaqanada naceybka ah. Tani waxay u baahan tahay qof kastaa soo sheego marka ay arkaan dhacdooyinka cunsuriyadda iyo/ama takoorka, halkii ay mas’uuliyadda saari lahaayeen kuwa aan caddaanka ahayn, ee aan reer galbeedka ahayn. Tani waxay u baahan tahay in dhammaan ururadu ay sameeyaan goobo nabdoon oo loogu talagalay naqdinta gudaha, gaar ahaan kuwa dadka midabka leh ee ku dhex jira ururada caddaanku ku badan yahay. Goobahan nabdoon waa inay ahaadaan kuwo ka warqaba jinsiga, da’daa iyo wax kasta oo kale oo saameyn kara rabitaanka inuu qofku wax naqdiyo. Waxaa intaa dheer, hoggaamiyeyaasha ururadu waa inay garwaaqsadaan guuldarradooda si ay u dhiirrigeliyan dhaqanka is-milicsiga iyo daacadnimada.



### ↗ **Si geesinimo leh u maalgali**

'Si geesinimo leh u maalgali' waa martiqaad ay maalgeliyayaashu ku abuuraan dariiqyo maalgelineed kuwaas oo la heli karo loona dhan yahay, iyo sidoo kale lagu aqbalo hubaal la'aanta iyo guuldarooyinka suurtagalka ah ee sareeya. Marka maalgeliyayaashu ay aqbalaan suurtagalmimada guuldarada barnaamijka, waxay albaabka u furaysaa habab maalgelineed oo hal-abuur leh isla markaana dabacsan, sida maalgeliyayaasha oo qaata natiijo xumada ka dhalata go'aanada ama qaata tallaabooyinka guusha ee gaarka ah. Dedaallada iyo tusaalayaasha kuwan waxa ka mid ah ururada oo lacag iska ururiya si ay u yareeyaan khataraha, maalgelinta tooska ah, maalgelinta PEER, Mashruuca Samafalka ee Aaminika-ku-saleysan, dejinta bartilmaameedyada bixinta maalgelinta aan xaddidnayn ee ururada maxalliga ah, raacida shuruudaha baarida ururada maxalliga ah, iyo wax ka beddelka shuruudaha mutaysiga ee mudnaanta siiya INGO-yada Galbeedka.

### ↗ **Si ka duwan u shaqaaleysi**

Ururadu waa inay joojiyaan dhaqanka ah inay marka hore u raadsadaan shaqaale ajaanib ah jago kasta oo saldhigisu yahay dibadda. Taas beddelkeeda, waa in loo qaataa in dhammaan jagooyinka ay buuxin karaan shaqaalaha maxalliga ahi. Ururada ku saleysan 'Waqooyiga Dunida', INGO-yadu waa inay xaqiijiyaan inay leeyihii siyaasado iyo istaratijiyado ay ku qaataan shaqaale kala duwan. Illaha ay kamidka tahay WCAPS 'Orgs in Solidarity' bayaanka wadajirka ee 12ka-qoddob waa in lagu saleeyaa haqadan.

### ↗ **Maalgeli aqoonta waddaniga ah**

Qeyb ka mid ah baa'biinta gumeysiga nidaamka gargaarka ayaa ah in la baaro waxa loo arko xogta saxda ah iyo cidda loo arko in ay leedahay xirfad ku filan oo ay ku ururin karto. Maalgeliyayaasha iyo ururadu waa inay maalgashadaan cilmi-baarayaasha maxalliga ah halkii ay maalgalin lahaayeen safarka cilmi-baarayaasha reer Galbeedka, waana inay adeegsadaan cilmi-baarisa lagu saleeyay qiyamka waddaniga ah iyo adeegsiga hababka waddaniga ah. Marka la qorsheynayo barnaamij, INGO-yadu waa inay la shaqeeyaan hoggaamiyeyeasha maxalliga ah si ay u baaraan qaababka, qaab-dhismeedyada iyo aragtiyaha isbeddelka ee jira, waana inay adeegsadaan kuwo cusub oo ku saleysan hababka maxaliga ah. Barnaamijiyada waa in lagu qiiimeeyaa qaab-dhismeedyo dhaqanka u gaar ah, oo ay dejijeen xirfadlayaasha maxalliga ahi. Khibrada waa in hab kale loo qeexaa una baahataa in lagu hagida dadka kale, khubarada dhallinyarada ah, khaburada haweenimada u dooda, khubarada haweenka ah iyo khubarada caqiidada/diinta, taas oo u saamaxaysa in la helo xalal guud, khibrad farsamo iyo go'aan-qaadasho firfircoo oo deegaanku hor kacayo. Si loo xaqiijiyo in xiriirka ka dhaxeeya maalgeliyayaasha, INGO-yada iyo bulshooyinka maxalliga ahi aanuu ahayn mid aan wax soo saar lahayn, natijooyinka barnaamijka iyo/ama cilmi-baarista waa in lala wadaagaa bulshada deegaanka, waana in ay ka horeysiyaan baahiyooda kuwa ururka.



## Tallooyinka sida gaarka ah loogu talagalay INGO-yada

### ↗ Hala joojiyo qaadhaan ururinta lagu raaligelinayo caddaanka

INGO-yadu waa in ay joojiyaan dhaqanka adeegsiga sawirada iyo hadalada wax u dhimaya hay'adda iyo sharafta bulshooyinka ee ay ku daraan agabkooda qaadhaan ururinta/suuq-geynta. Waxaa intaa dheer, waa in ay sameeyaan la xisaabtanka xidhiidhadooda dibadda iyo gudaha si ay u bixiyaan halbeega horumarinta mustaqbalka, waana inay tixgeliyaan habab kale oo iskaashi leh oo lagu diwaangeliyo dedaalada Koonfurta Dunida.

### ↗ Ku darso fikirada wareejinta xeeladaha ururka

INGO-yadu waa inay tixgeliyaan adeegsiga fikirada wareejinta, iyagoo dejinaya marxalado qayaxan oo loogu wareejinayo awooda iyo kheyraadka ururada maxalliga ah. Waa in fiiro gaar ah la yeeshaa si loo xaqiijiyo in ururada maxalliga ah ee aadka ugu dhow Waqooyiga Dunida aadkana u yaqaana nidaamka gargaarka caalamiga ah aan mudhaan la siin. Fikrada wareejinta ee noocan oo kale ah waa in lagu xardhaa istiraatijiyado urureed oo cad kuwaas oo cabbiraya guusha iyada oo la eegayo heerka uu INGO-gu u yaraanyo, halkii uu ka balaadhin lahaa, raadkiisa urureed ee soo jireenka ah (tusaale, tirada shaqaalaha ay shaqaaleysiiso, heerka dakhli ee ay kasbato. iyo tirada dadka iyo bulshooyinka ay sida tooska ah ugu adeegto). Hirgelinta tooska ah waa in la joojiyaa iyadoo laga doorbidayo u wareejinta kheyraadka ururada maxalliga ah waana in loo qoondeeyaa xaaladdo gaar ah oo kaliya marka ay codsadaan ururada maxalliga ahi. Xafiisyada waddanku waa inay lahaadaan bartilmaameedyo qayaxan oo lagu taageerayo ururada bulshada rayidka ah ee deegaanka, kuwaas oo ay ku jiraan siinta ugu yaraan 25% maalgelinta ururada maxalliga ah, waana in yoolal hammi sare leh loo dejyaa 5-10 sanno ee soo socda.

### ↗ Ka fogow beddelka meelaynta

INGO-yadu waa inay ka fogaadaan ‘beddelka’ (sida., dib-u-micnaynta ama dib-u-habaynta) meelaynta si ay u difaacaan mawqif urureed oo gaar ah ama si ay u caddeeyaan xaaladda jirta. Tusaalayaasha dhaqankan waxa ka mid ah ku qeexida xafiiska wadanka INGO-ga mid ‘maxalli’ ah iyadoo lagu saleynayo tirada shaqaalaha maxalliga ah ee ka shaqeeya, diiwaangelinta ururka sidii urur ‘Qaran’ ah iyo boqolleyda dhaqaalaha uu ka soo ururiyo qaranka, halkii uu ka heli lahaa ururkiisa ‘waalidka’ ah ee caalamiga ah. Haddii ay hay’adu xafiis wadan leedahay waa in ay aqbashaa aqoonsigan in ay tahay INGO waana inay ku sharaxdaa wada xidhiidhkaa dibada inay ka warqabto awooda ay leedahay iyo masuuliyada ka saaran in ay xukunka ka degto.



### ↗ Dib-u-qiiimee iskaashiga lala leeyahay ururada maxalliga ah

INGO-yadu waa inay joojiyaan dhaqanka raadinta ‘shuraakada fulinta’ ee muddada-gaabani, taa beddelkeedana waa inay abuuraan iskaashiyo istiraatijiyadeed oo muddo-fog ah oo aanay go’amin wejiyada mashruucu. Sagaalka mabda’ ee iskaashiga ee Peace Direct ee iskaashiga wax ku ool ah ayaa laga yaabaa inuu noqdo ‘bar bilow wanaagsan oo ay INGO-yadu ka bilaabaan. Kuwani waa (1) Aqoonso oo ka hortag isu dheelitir la’aanta awoodda; (2) Ka hortag cunsuriyadda iyo cuqdada; (3) Taageer oo maalgasho hoggaanka maxalliga ah; (4) Ku dedaal isla xisaabtanka iyo barashada wadajirka ah; (5) Samee iskaashi muddo dheer ah; (5) Bixi maalgelin aan xaddidnayn; (6) Noqo mid wax la qabsan kara, isla markaana kor u qaad wax la qabsiga iyo adkeysiga shuraakadaada; (7) U tixgeli kheyraadka aan dhaqaalaha ahayn qeyb ka mid ah shuraako kasta; iyo (9) Xaqiji in wareejinta shuraakada ay tahay dedaal iskaashi ah.

## Tallooyinka loo soo jeedinayo shakhsiyaadka

### ↗ Milicso cida aad tahay

Si loo tirtiro aragtida baahsan ee ‘Raaligelinta caddaanka’ ee weli maamulata qeybaha gargaarka, horumarinta iyo nabad-dhisidda, xirfadle kastaa - kuwa saldhigoodu yahay deegaanka iyo kuwa caalamiga ahba - waa inuu milicsadaa sababta ku lug yeelashadiisa qeybtan. Su’alaha ay tahay in la is weydiyo waxa ka mid ah: Waa maxay mudnaanta ay aqoonsiyadiinu idin siinayaan? Siyaabahee ayaad u xoojisay ‘Raaligelinta caddaanka’ ee qaybaha?

### ↗ Dhulka isdhig

Taariikhda qeybta gargaarka waxaa lagu dhisay fikradda ah in reer galbeedku ay hayaan jawaabta. Kala dirida madaxda sare waxay u baahan tahay in xirfadleyaasha caalamiga ahi ay shaqadooda u qabtaan si daacad ah. Waa muhiim inay soo dhaweeyaan dhaleeceynta iyo jawaab-celinta ay bixiyaan Koonfurta Dunidu, iyo inay ka wax ka qabtaan faallooyinkaas. Qeyb ka mid ah mudnaan ka qaadista aqoonta Galbeedka aya u furan hababka maxalliga ah ee loo maro aqoonta iyo fahamka xaaladaha khaaska ah ee horumarka, gargaarka bini’aadantinimo iyo nabad-dhisidda.




## ↗ Wareejinta helitaanka iyo awoodda

Intii wada-tashigu socday, ka qeybgalayaashu waxay wadaageen waayo-aragnimooyin badan oo ku saabsan qof Cadaan ah oo ka soo jeeda Waqooyiga Adduunka oo si eex ah loo siiyay marin iyo fursado lagana doorbiday qof midab leh oo ka soo jeeda socda Koonfurta Adduunka. Xirfadlayaasha Waqooyiga Adduunka ayaa markaa gacan ka geysan kara u wareejinta awoodda bulshooyinka laga reebay iyagoo u jiheynaya fursadaha xirfadlayaasha la takooro ee haddii kale la ilduuifi lahaa. Kuwa heysta awoodda hay'adeed iyo jagooyinka hoggaaminta waxay dhiirrigelin daahfurnaanta wada-hadalada ku saabsan cunsuriyadda, takoorka iyo baa'biinta gumeysiga. Doorka ay ka ciyaraan xirfadlayaasha ka socda Waqooyiga Dunidu baa'biinta gumeysiga goobahan ayaa mararka qaarkood noqon doonta inay uga faa'ideystaan awooddooda dhiirrigelinta ku darida iyo mararka qaarkood tanaasulid, taas oo meel u baneynaya xirfadlayaasha maxaliga ah si ay u qabsadaan booska.

## ↗ Abaabul

Dhaqdhaqaqayaasha iyo xirfadlayaasha maxalliga ah ee doonaya inay ka hortagaan cunsuriyadda qaabeysan isla markaana beddelaan awoodda nidaamku waxay inta badan arki doonaan inay ka reebeen wada-hadalada kuwa nidaamka ku jira ee raba inay awoodda sii haystaan, ama xitaa ay aflagaadeeyaan. Si taas wax looga qabto, waxa muhiim ah in dhaqdhaqaqayaashu ay is-abaabulaan kuna xidhmaan kooxaha kale ee heer qaran iyo heer caalamiba. Waxa jira shabakado iyo kooxo taageera ajendahan, sida shabakada NEAR, CIVICUS iyo shabakadda START, iyo sidoo kale kooxo badan oo aan rasmi ahayn oo ka kooban dhaqdhaqaqayaal doonaya inay arrintan ku soo bandhigaan heerkanka qaranka iyo heer caalamiga ahba.



WOMEN OF COLOR ADVANCING PEACE,  
SECURITY, AND CONFLICT TRANSFORMATION